

Anigu cunsuri ma ihi laakiin...



Ma dareentay in uu takoor ka jiro guryeynta Malta?

Maka warqabtaa in sharci dajiyaasha Malta ay mamnuuceen takoorka ku dhisan jinsiga ama qoomiyadda ooy Amrayaan Sinaanta Dadka?

Ogow Xuquuqdaada!

Waa maxay kala takoor?

Kala takoor ama kala sooc wuxuu dhacaa marka qof ama koox loola dhaqmo si dadka kale kaduwan ayada oo sal looga dhigayo sifooyin dhowr ah sida Jinsiga, lab/dhadig, farac, asal, da'da, curyaanimada, diinta iyo wixi lamid ah

Kala takoorka guryaha wuxuu dhacaa marka si toos ah ama si dadban loogu diido qof ama koox xaquuqdooda ay ku gataan ama ku kiraystaan hoyi oo sal looga dhigayo "jinsiga" faraca ama midabka.

Maxay muhiim u tahay in la aqoonsado?

Helitaanka guryayntu waa xuquuq bini'aadam oo asaasi ah, waxayna muhiim u tahay in aad si buuxda uga qaybgasho bulshada.

Marka Malta la joogo waxaa arin sharci ka soo ka soo horjeeda ah in lagu takooro sababtoo ah jinsiyadada ama asalka faracaaga

Waligaa ma dareentay takoor xagga guryeynta ah?

Tusaalayasha kalatakoorka la xiriira guryaha waxaa ka mid ah:

- in ladiido in lagaa kireeyo, ayado sal looga dhigey sifooyin la hubo sida midabka ama sinjiga asalka.
- dajinta heerar kiro oo kala duwan, sida kiro aad u saraysa, ama lacago dheef sare ah.
- in laguula dhaqmo si ka duwan kuwa kale, tusaale ahaan, In lagu diido heshiis qoran, rasiit ama koobi biilka ah.
- dalbashada lacag dheeri ah oo ka baxsan heshiiska.
- sabab la'aan lagagaga saaray guriga, iyadoo sal looga dhigayo eedaymo aan xaqiiq ahayn.
- gabood falid afka ama gacanta ah, ama laguula dhaqmay si ka duwan dhinacyada kale.

Waxaad xaq u leedahay inaad ka hadashid ama u ashtakootid sharci ilaaliyasha ama komishinka qarana ee sinaanshaha (NCPE) hadii aadaminsan tahay inaad tahay dhibane midab takoor.



Macluumaad loogu talagalay dadka guryaha deggan



Macluumaad loogu talagalay dadka guryaha deggan



Kumishinka Qaranka ee Hormarinta Sinaanta (NCPE)
Gattard House, National Road, Blata I-Bajda HMR 9010, MALTA.
Taleefoon: +356 2590 3850 Fakis: +356 2590 3851
limayl: equality@gov.mt Web: www.equality.gov.mt



Nagala soco Facebook



Barnaamijkan waxaa loo aas aasay inuu dhaqaale ahaan taageero taabba galinta ujeedooyinka Midowga Yurub ee dhinaca shaqaalaynta, arimaha bulshada iyo in fursadaha si siman looga wadahelo deegaanada iyo si ay uga qayb qaadato ku guulaysashada hadafyada istaraatiijiyadeed ee ay Yurub ka leedahay arimahan marka la gaaro 2020. Barnaamijka todobada sano wuxuu bartilmaameedsanayaa dhamaan dadka ay khusayso ee caawin kara qaabaynta iyo hormarinta hab wax ku ool ah oo haboon kaasoo ku aaddan shaqaalaynta iyo arimaha bulshada iyo qarshaynta kaasoo laga hirgaliyo EU-27, EFTAEEA iyo wadamada u sharaxan ama horey ugu sharaxnaa. Wixii warbixin dheeri ah ka fiiri: <http://ec.europa.eu/progress>

Warbixinta ku jirta qoraalkan kama turjumayso meesh ay ka taagantahay ama fikradda Kumishanka Midowga Yurub.

Maxaad samayn kartaa?

Hadii aad u malaynaysid in lagu gaystay takoor ku dhisan jinsiga ama asalka faraca xaq waxaad u leedahay inaad cabasho gudbiso.

Waxaad kala xiriir kartaa Komishinka Qaranka ee Abaabulka iyo Sinaanshaha (NCPE).

NCPE waxay:

- dhagaysandoontaa dhacda daada ku siin doontaa warbixin
- kugu hagaysaa wixi aad samayn kartid
- kugu caawinaysaa buuxinta foomka cabashada
- baaraysaa cabashadaada

Waxaad xaq u leedahay inaad ka hadashid ama u ashtakootid sharci ilaaliyasha ama komishinka qaranka ee sinaanshaha (NCPE) hadii aadaminsan tahay inaad tahay dhibane midab takoor.

Sida ku qoran ogaysiiska 85 ee 2007, sharciga Malta waxaa loo keenay in lagu ilaaliyo sinaanta jinsiyadaha ee soo baxay 2000/43/EC.

Wargaliinta sharciga ah waxay banaanka dhigaysaa faquuqqa iyo takooridda sharci darada ah ee ku dhisan jinsiga iyo asalka faraca ee la xiriirta alaabaha, adeegyada iyo qaybintooda.

Maxay tani ka macno tahay?

Tan macnaheeda waxaa weeye in ay sharci darro ka tahay Malta gudaheeda in qof laga takooro helitaanka alaabta iyo adeegyada dadwaynaha la siiyo. Tan waxaa ka mid ah habka loo qaybiyo guryeynta.

Qofkii lagu helo ku xadgudba sharcigaas wuxuu mutaysan doonaa ganaax, ama xabsi, ama labadaba. Waxaad kaloo xaq u leedahay magdhow inaad waydiisatid.

Komishinka Qaranka ee Abaabulka iyo Sinaanshaha (NCPE) waa Haayada Sinaanshaha Qaranka ee Malta taasoo ku shaqo leh noocyada kala duwan ee takoorka ah ay ka mid yihiin jinsiga ama asalka faraca.

Wixii faahfaahin oo dheeraad ah ee Komishinka Qaranka ee Abaabulka iyo Sinaanshaha (NCPE), Agaasinka Sinaanta Jinsiyada 2000/43/EC waxay xuquuqdaadu tahayna waxad kala xiriiri kartaa NCPE:
Gattard House, National Road, Blata I-Bajda HMR 9010.

Taleefoon: **2590 3850** Fakis: **2590 3851** limayl: **equality@gov.mt**

Anigu cunsuri ma ihi laakiin...

